



## Dayactirka RHS, Wargayska Madaxa Mashruuca #4

Nov. 27, 2013

Iyadoo oo imika uu qof waliba u sal dhigay fasaxii dabaayaqada todobaadka, waxa aanu idin soo gudbinaynaa macluumaadku u dambeeyey mashruucii casriyeynta ee Dugsiga Sare ee Roosevelt:

Isniintii la soo dhaafay, Gudiga Dugsiyada ee PPS waxa ay si rasmi ah ugu codeeyeen in la kordhiyo bedka casriyeynta Dugsiga Sare ee Roosevelt min 1200 oo arday / 1500 oo arday ilaa 1350/1700 ee tirada ugu badan ee wax ka baran karta. Kordhinta tirada ardayda uu qaadi karo dugsiga waxa ay ku kordhinaysaa fasalo mashruucan iyo bedka goobta ciyaaraha, maktabada, iyo maqaayada oo uu kordhin doono

Galabnimadii xigtay, kooxda qaabaynta oo uu hogaaminayey qaabeeye Bassetti, ayaa soo bandhigay xafladii bulshada qorshaha imika ee qaab shaxanaynta kulankan oo lagu qabtay maqaayada dugsiga. Qorshaha shaxanaynta waxa uu ka dhashay 8 fadhi oo ay wada qaateen Kooxda ka Talinta Qaabaynta (DAG), 7 kulan howleed gaagaaban oo ardayda lala yeeshay, laba howlmaalmeedyo kuwa bulshada ah iyo kulamo dhowr ahaa oo ay bulshadu yeeshen kolka lagu daro howlwadeenada/macalimiinta PTSA, RHS, dugsiyada barataara PTSA, iyo Hogaanka Kooxaha Ganacsiga.

Qorshaha imika waxaa uu qaadanayaa muuqa guud ee xarunta iyo qaybaha uu ka kooban yahay inta badan dhismuhu. Waxa uu u muuqanayaa tasmada goobaha sida ciyaaraha, masraxa, goobaha guud/maqaayada iyo fasalada dariiqad tilmaamaysa mudnaanta qaabaynta iyo fursadihii waxbarasho ee lagu qeexay kulamadii la soo xusay.

Kulankii bulshadu waxa uu ahaa fursad aad ku waydiin karto su'aalaha la xidhiidha qaabaynta iyo talaabooyinka xiga. Gaadh ahaan, dood-wanaad ku jeeday tayeynta fursadaha maadooyinka aan qasabka ahayn ama "Dowga shaqada" ee ay ku qaadan karaa dhismaha la casriyeynayo ee Roosevelt. Wada-hadalani waxa ay socon doonaan tan iyo bilaha soo socda, fadlan naga warsug goor dhow tan la xidhiidha ka qayb qaadashada.

Aad baanu ugu faraxsanahay soo badhigida maxsuulkii kulamadii bulshada ee bila dhowr ah soo socday iyo qaad ogolaashihii Gudiga Dugsiyada . Qorshaha imika ee la door biday, sida lagu tilmaami doono kulanka gudiga oo ka dhici doona **Isniinta, December 2 saacadu kolka ay tahay 6:00 fiidnimo Qolka Gudiga ee BESC** . U codaynta ogolaashaha waxaa laga yaabaa in la qabto kulamada dambe - laba mid un December 9 ama December 16.

Xubnaha bulshadu ma danaynayaan in arkaan bandhiga, kan oo ay qayb ahaan ka mid noqon doonto qaabka iyo warbixin kooban ku jeeda wadaaga meel marinta ee kooxda mashruuca, waxa ay idinku dhiiri gelinayaan in aad ka soo qayb gashaan Isniinta. Waxa aannu isku dayi doonaa in aanu carabowno ka qayb galka xubnaheena (DAG) iyo ka qayb qaadashada meel marinta howshan.

Ogolaashaha qorshaha imika ee gudiga kadib, waxa aannu u gudbi doonaa wejiga xiga: Shaxanaynta qaabka oo iyadu uruurin donta fikradihii qorshayntii hore islamarkaana u qaabayn doonta macluumaad iyo sida goobtu u muuqan doonto. Maalmaha kulamada bulshada ee wejiga xiga waxa la idin ku soo wargelin doonaa waqti dhow.

Waanu idiin kaga mahadnaqaynaa warcelinta iyo ka qayb qaadashada aydin in dhawaytaba aad ku barataarayseen bilihii la soo dhaafay, iyadoo oo aan idinka filayno kuwiinii hore iyo kuwa cusub oo adinka ah ka qayb qaadashada geedi socodka lagu hurumarinayo dugisga. Fadlan nala soo xidhiidh su'aal walba oo kugu dhalata adiga oo adeegsanaya [rhsmod@pps.net](mailto:rhsmod@pps.net).

*Michelle R. M. Platter*

*Madaxa Guud ee Mashruuca – Roosevelt High School  
"Go Riders!"*